

Dadka tallaal buuxa qaatay oo talooyinka loo debcinayo

Talooyinka dadka tallaal buuxa qaatay ayay dawladdu debcinaysaa, kaddib markii uu Machadka caafimaadka dadweynuhu sidaas ku taliyay. Marka la joogo guryaha gaarka ah dadka tallaalka buuxa qaatay way u dhowaan karaan (1 mitir uga dhowaan karaan) dadka kale ee ayaguna tallaalka buuxa qaatay. Waxay sidoo kale u dhowaan karaan dadka aan tallaallayn laakiin aan ka mid ahayn kuwa sida gaarka ah ugu nugul haddii uu cudurku ku dhoco. Marka dibedda la joogo talooyin iyo xeerar isku mid ah ayay raacayaan kuwa tallaallan iyo kuwa aan tallaallayn.

– Waxaan haynaa aqoon isa soo taraysa oo sheegaysa in tallaalku qofka si fiican uga difaaco in uu cudurka aad ugu xanuunsado iyo in uu sii gudbiyo. Aqoontaas waa in aan uga faa’iidaysannaa debcinta tillaabooyinka meelaha ay taasi suurtaggalka tahay, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Laba jeer in la tallaalo ayuu qofku u baahan yahay si uu difaac buuxa u helo.

Xeerar isku mid ah marka dibedda la joogo

In kasta oo difaaca tallaalku wanaagsan yahay, haddana waa suurtaggal in uu covid-19 ku dhoco dadka la tallaalay. Waxaa sidoo kale suurtaggal ah in dadka tallaallan ay cudurka sii gudbiyaan. Taas oo dhici karta ayada oo aan qofku dareemin in uu cudurka qabo.

– Marka la joogo dibedda dadka dhexdiisa lama ogaan karo in ay kuu dhow yihiin dad aan tallaallayn oo ka mid ah kuwa sida gaarka ah ugu nugul haddii uu cudurku ku dhoco. Ilaa iyo inta ay bulshada jiraan dad badan oo aan cudurka ka difaacnayn, islamarkaana ay xataa kuwa tallaalan mararka qaarkood cudurka

qaadi karaan gudbinna karaan, ayay khasab tahay in dhammaan xeerar iyo talooyin isku mid ah la raaco marka dibedda la joogo, ayuu yiri Høie. Wuxuu hoosta ka xarriiqay in meelaha dadku ku kulmaan looga baahan yahay talooyin iyo xeerar fudud oo waadax.

Shahaado koroono ayaa soo bixi doonta

– Marka dad badan la tallaalo, waxaa dhici doona in la dadka oo dhan laga debciyo xaddidaadda tirada iyo tillaabooyinka guud ee ka hortagga faafidda cudurka ee bulshada dhexdeeda. Waxaan islamarkaana ku hawlannahay shahaado koroone oo dalka oo dhan ka shaqaysa, ayuu yiri Høie.

Shahaadada koroonuhu waxay xambaarsanaan doontaa macluumaadka xaaladda tallaalka, in uu qofka ku dhacay covid-19 iyo natiijada tijaabadii u danbaysay ee la qaaday. Arrintaan ayaa keeni karta in shuruudaha qaarkood laga debciyo dadka shahaadadaan haysta. Laakiin tallaalka keliya taas lagu gaari maayo.

– Waxaan sidoo kale eegaynaa saamaynta uu tallaalku ku yeelanayo waajibka karantiilka, ayuu yiri Høie.

Talo la siinayo dadka qaatay tallaalka buuxa:

- Gudaha guryaha gaarka ah iyo gaariga dadka tallaalka buuxa qaatay way u dhowaan karaan (1 mitir uga dhowaan karaan) dadka kale ee ayaguna tallaalka qaatay in kasta oo ay ka mid yihiin kuwa sida gaarka ah ugu nugul haddii uu cudurku ku dhoco.
- Dadka tallaalka buuxa qaatay way u dhowaan karaan dadka aan tallaalnayn ee aan ka mid ahayn kuwa sida gaarka ah ugu nugul haddii uu cudurku ku dhoco.
- Dadka tallaalka buuxa qaatay weli waa in ay masaafo wanaagsan (ugu yaraan 1 mitir) ka fogaadaan dadka ka mid ah kuwa sida gaarka ah ugu nugul haddii uu cudurku ku dhoco ee aan tallaalnayn ee aanay la degganayn.

- Dadka dhexdiisa (dibedda oo lagu daray gaadiidka dadweynaha) talooyinka iyo xeerarka waxba lagama beddelin. Sida talooyinka iyo xeerarka inta la kala fogaanayo, tirada, nadaafadda iyo isticmaalka af-daboolka.